



**WAR-SAXAAFADEED**


**Muqdisho**, 27-11-2020, Dowladda Federaalka Soomaaliya waxay cambaareyneysaa falkii waxashnimada lahaa ee ay Nabadiidka argagaxisadu ay caawa ku bartilmaamadsadeen shacabka Soomaaliyeed ee aan waxba galabsan.

Ugu yaraan 6 muwaadiniin Soomaaliyeed ah ayaa ku dhintay weerarkaasi halka 8 kalana ay ku dhaawacmeen sida uu xaqiijiyay taliska Ciidanka Booliska Soomaaliyeed.

Wasiirka Warfaafinta, Cismaan Dubbe ayaa tacsii u diray Qoysaska ku waayay Ehelkooda Weerarkaasi waxashnimo ee ka baxsan islaamnida iyo bini'aadam nimada. Isagoona kuwa dhaawacaha ahna u rajeeyey in Rabbi u booga dhayo, una ballanqaaday in Dowladdoodu is garab istaagayso oo aanay waxba ka hagraan doonin.

Falkaan arxan darrada ah waxuu caddeyn u yahay sida kooxahan calooshood u shaqeystayaasha ah ee ka macaasha daadinta dhiigga shacabka Soomaaliyeed ay mar kasta ugu hamuun qabaan baabi'inta dadka si aan kala sooc laheyn.

Dowladda oo kaashaneysa shacabka Soomaaliyeed waxay ku reja weyntahay in guul laga gaaro dagaalka lagu soo afjarayo kooxaha argagaxisada ah, diin laawayaasha ah ee danta ka dhex arkay burburinta dalka iyo baabi'inta ummadda Soomaaliyeed.



**DHAMAAD**